

## QORAAL KOOBAN

Anu E Castaneda, Shadia Rask, Päivikki Koponen, Mulki Mölsä, Seppo Koskinen (toim.). Maahanmuuttajien terveys ja hyvinvointi. Tutkimus venäläis-, somalialais- ja kurditaustaisista Suomessa. (Caafimaad iyo nololwanaaga ajaanibta. Cilmibaaris ruushka-, soomaalida- iyo kurdishta ku nool Finland.) Machadka caafimaadka iyo nololwanaaga (THL). Raboot 61/2012, 363 boga. Helsinki 2012.

Muhiimadda howshan oo aheyd in ay helaan cilmibaarayaasha caafimaadka iyo nololwanaaga ajaanibta (Maamu) macluumaadkey cilmibaaristan ku ogaadeen iney iney sii adeegsadaan suurogal ahaan dadyowga u baahan doona iyo abaabulkooda. Waxaan rajeyneynaa, in Maamu-hanke ([www.thl.fi/maamu](http://www.thl.fi/maamu)) warbixintan natiijoooyinka ka soo baxay qorsheynta iyo natiijada jawaabaadkii ay noqoto mashruuc abaabul oo ballaaran kaasoo ka faa'iideystaan aqoonyahanada kuwaasoo iyaguna si fiican u darsa una ballaariyaan macluumaadkan.

Cilmibaarista caafimaadka iyo nololwanaaga ajaanibta waxaa loogu yeerey kun raashiyaan, kun soomaaliya iyo kun kurdish ah dad da'aadoodu u dhaxeysa 18-64 jiro, kuwasoo ku nool Helsinki, Espoo, Vantaa, Turku, Tampere ama Vaasa. Dadyowgaas loo yeerey waxay ku noolaayeen Finland ugu yaraan sanad. Wareysiga iyo baarista caafimaadkaba waxaa sameynayey baarayaasha goobtaas raashiyaan, soomaali iyo kurdishaan kuwasoo ku hadlaya la baaraha luuqadiisa iyo luuqada finnishka. Baarayaashuna waa kuwo si qaasa looga soo baaraan dagey, hufnaanta looga qeybqaateyna waxay aheyd mid aad uga sareysa markii loo fiiriyo baaritaamadii lagu sameeyey waddamo kaloo badan. Baaristii dadka asalkoosu ahaa ruushka 70% asal ahaan soomaalida 51% iyo asal ahaan kurdida 63% ayaa ka qeybqaatey cilmibaaristii ugu yaraan qeyb kamid ah. Waxaa agaasimaya qorsheynta iyo hirgelinteedaba Machadka caafimaadka iyo nololwadaaga (THL) iyagoo la kaashayanaya aqoonyahanada ay la leeyihiin cilmi isweydaarsiga. Da'da labaarayashaa 18-64 jir tirokoobka natiijada ka soo baxdey waxaa lala barbar dhigayaa qeybaha ajaanibta kale, kuwaasoo haday yihiin kuwo u qalma isbarbar dhig waxaana lagu soo wargelin cilmibaarista caafimaadka 2011.

Ajaanibta asalkoodu ahaa ruushka aqoonta tacliinta wey ka sareeyeen markii loo fiiriyo kuwo asalkoodu ahaa waddamada kale markii loo eego da'dooda. Tacliinta ay soomaalida leeyihiin ayaa u liidatey. Sadex meelood meel ayaan haweenka soomaaliyeed dhiganba weligood iskuul. Qiyaastii tobonkiiba haweenka mid ayaa wax yar qorta amaba aanan waxba qorin haweenka soomaalida iyo kurdishta, nimankana boqolkii labo. Luuqada swidhiska ama finnishka ku hadlidiisa iney fahmaan aad ayey ugu adkeyd hawennka asalkoodu ahaa soomaalida sadexdii haweenba mid kamid ah iyo kurdidhtoo lixdii haweenba mid, waxayaabaha ugu adag ooy sheegeena waa kadaneysga bankiyada, xafiisyada iyo wixii lamida. Aqoondarada isticmaalka

internetkana waa mid ku badan haweenka soomaalida (28%) haweenka kurdishkana (15%). Soomaalida iyo ruushka nimankooduba gebi ahaan waxay u arkeen iney yihiin kuwa shaqeyn kara. Horin walbaba ajaaniba oo kaqeybqaadatey cilmibaaristan wey lahaayeen kuwo shaqeyn balse waxaa jirey kuwo iyaguna shaqo la'aan ah ama kuwo iyaguna shaqo la'aan darteed loo soo fasaxay iney ku jireen oo isku da' u badnaa. Sadex meelood labo meel soomaalida laakiin kurdidu waxay ahaayeen sadexdiiba mid waa kuwo si joogta ugu xiran hey'ado ama howlo urureed. Raashiyaanku iyagu waa kuwo si hufan ula socda waddankoodii hore iyo Finlandba waxyaabaha ka jira. Si hufnaan leh ayaa codeyntii doorashadii golaha baarlamaanka Finland niman badan oo saamliya ka codeeyeen. kuwa sida hufan aan u codeyna waxay ahaayeen haweenka asalkoodu ahaa soomaaliga.

Haweenka asalkoodu ahaa kurdishka iyo ruushka caafimaadkoodu wuu ka liitey markii loo fiirayo kuwa kalee ka qeybqaadatey cilmibaaristan, meeshey nimanka soomaalida ay u arkeen in caafimaadkoodu yahay heer sare. Soomaaliduna waxay ahaayeen kuwo ugu qanacsan guud ahaan noloshooda. Waxayna si aan caadi aheyn ugu qanacsanaayeen howlmaalmeedkooda iyo sidey ku noolaan lahaayeen, xitaa iyadoo qaarkood inta baddan sheeganaya dhibaataada ka heysata ka daneysiga bankiga iyo xafiisyada kaleba iyo weliba isticmaalka ku daneysiga shabakada. Asal ahaan ruushka waa kuwo ugu wanaagsanaa baaritaankii tabarta iyo waxqabadkaba, soomaalidu waxay ahaayeen kuwo ugu liita. Kurdiduna waxay ahaayeen kuwo maqalka iyo aragtida ku dhibaateysan. Cayilka iyo miisanka badan wuxuu ahaa mid ku baddan haweenka soomaalida iyo haweenka kurdidu iyo weliba nimanka kurdidu. Ruushkana gebi ahaan inta ka qeybqaadatey baaristan cayilka waxaa ugu soo dhowaa dhexda haweenka taasoo markii loo eego haweenka ruushka aan ku badneyn. Macaanka ama sokorowga inta sheegatey iyo baaritaanka sheybaarka natijadiisaba kuwa u badan waxay ahaayeen haweenka soomaalida. Dhiiga kacsan ama ku dhow waxaa u badnaa kuwa asalkoodu ahaa ruushka. Nimanka ruushka iyo kurdidu ayaa u badnaa sigaar cabista. laakiin guud ahaan haweenkii kaga qeybgaley meelaha kala duwan cilmibaaristan kuma badneyn cabista sigaarka. Soomaalida maba cabaan sigaarka 18-29 jirada ruushka intooda baddan ugu yaraan 40% ayaa sheegey iney cabaan muqaadiraadka kannabis. Qamriga isticmaalkiisa waa mid ku badnaa nimanka ruushka. Soomaalidu aad bey ugu yar tahay wax cuna maalin walba qudrad ama miro fireesh ah. Soomaalidu iy i kurdidaba waa kuwo ugu aalamiitada liito markii loo eego gebi ahaan baaritaamadii lagu sameeyey meelaha kala duwan.

Habka hubantida ee looga hortago dhalmada caruurta ama ilmahoo kadilma waa mid ku baddan haweenka soomaalida, kuwaasoo horeyba wax u soo dhaley. Ilmo iska soo xaaqista waxaa u badan haweenka ruushka. Si xad dhaafa qeybo haweenka soomaalida iyo haweenka kurdishka ah ayaa sheegey iney guddan yihiin.

Kurdidu 78% soomaalida 57% iyo ruushka 23% dareenkey ku reebtey qalbigooda iyo dhibaataadii ay kala soo kulmeen waddankoodii hore. Dhaawaca aan ba'eyn ee loogestey wuxuu ku badnaa kurdishka, taasoo tobankii kurdi mid kamida loogestey dhaawac aan ka ba'eyn. Aflagaadada iyo cayda loo geystey intey

Finland ku noolaayeen waa mid maalin walboo noloshooda waxaa ku jawaabey shantii la wareystayba mid kamid ah, waxaa sidoo kale ku badnaa xushmad la'aan iyo qadarin xumo lagula dhaqmey. Walbahaar iyo nayidjab dareenkeeda waxay aheyd mid haweenka kurdida labadiiba ay mid dareemeysey. nimanka ruusha iyo kurdida afartiiba mid ayaa dareenkaas qabey, markii tirakoobka goobihii cilmibaarista ka jirtey leysku geeyey walwalka iyo dareenka niyadjabka waxay aheyd wax kayar 10%. Adeegyada cilminafsiiga waxaa isticmaalkeeda ku badnaa kurdida iyo ruuska. Baqdinta iyo walwalka guud ahaan lagu ogaadey cilmibaaristan waxaa u badanaa hormooyinkaas.

Soomaalida, kurdida iyo ruushka ee da'doodu u dhexeysey 18–64 jir ee baritaankan ka qeybqaatey iyo dhamaan degmooyinkii lagu sameynayey cilmibaaristan waxay badankood isticmaalaan adeegyada dhaqaatirta jooga rugaha caafimaadka dadweynaha kuwasoo inta baddan la kulma dhaqaatiirta heeganka ah, aad bey ugu yaryihiin kuwa isticmaala rugaha caafimaadka shaqaalaha iyo dhaqaatiirta bareefadka ah iyo daawooyinkeey qoraanba. Asal ahaan kuwa ruushka isticmaalida dhaqaatiirta meelaha kale een aheyn Finland wey ku baddan yihiin, sababtuna helista daryeelka ayaa waxay tahay mid safkeedu dheer yahay, qiimahoo qaaliya iyo luuqadii oo ku adag. Kuwa baxnaaninta u baahan waxaa ugu badnaa ruushka iyo kurdida kuwasoo shantii qofba uu mid kamid ahi fikirkiisu ahaa inuu u baahan yahay baxnaanin.

Dareenka ah in la takoorey waxay ku badneyd kuwa waqtiga dheer ku noolaa Finland iyo dhalinyarada, markii loo fiiriyo kuwo iyagu degnaa waqtiga yar iyo dadka waaweyn ee u soo guurey Finland. Tabardarida iyo taagdaradaba waa mid ay kaga baddan yihiin soomaalida iyo kurdida waqtiga dheer halkan ku noolaa markii loo eego kuwooda dhawaan usoo guurey Finland. Dhalinyarada asalkoodu ahaa ruushka ee usoo guurey Finland waa kuwa iyagu maqaadiirta ugu darran heysato isticmaalana muqaadiraadka ama maandooriyaal una baahda adeegyada cilmi nafsiga. Iyagaana u baddan kuwa dareensan in la takoorey isla mar ahaanta noloshuna wax macna u laheyn markii loo eego kuwooda waaweyn ee u soo guurey Finland.

Maalgelinta ay keydka dhaqaalaha arrimaha bulshadda ee Yurub maalgelisey mashruuca la socodka degmooyinka ku howlan caafimaadka iyo kartida shaqo ee ajaanibta natiijada cilmibaaristan iyo habka loo sameeyey waxay hormarineysaa oo looga faa'iideysanayaa sidii lagu horumarin lahaa. Waxyaabihii loo adeegsadey cilmibaaristan oo lagu cabirayey iyadoo loo turjumey luuqado kale macluumaadka cilmibaaristan iyo cabbirkii kartida shaqo waxaad si xora uga heleysaa boga warbixinada TOIMIA. Waxaa natiijaada cilmibaaristan sidoo kale rabootgeeda ka heleysaa adeega shabakada caafimaadkeena, halkaasooy kuu sahlanaan doonto inaad is barbar dhigto heerarka nawaaxiyadii ama hormooyinkii isku jinsiyada ahaa. Waxaa intaa sii dheer in la qorsheynayo cilmibaaris caafimaadka iyo nololwanaaga ajaanibta ka sii socon doonta qeybo nawaaxiga cilmibaarista caafimaadka iyo nololwanaaga (ATH).

Waayo aragnimadda iyo aqoonta uu mashruuca Maamu u leeyahay cilmibaarista dhaqmada iyo luuqadaha dadyowga ku yar waddanka howsha ugu adag waxay tahay waxbarista iyo tasmada shaqo ee howlwadeenada cilmibaarista, la xiriirista shaqsiyaadka isku soo duwistooda, talosiinta wareystayaasha xalka ama xalinta luuqadaha iyo dhaqamada hirgelintooda. Waxaa arrinn wanaagsan in lagu wareysto la wareystaha afkiisa hooyo, balse wareystaha iyo la waeystaha isku luuqada ah mararka qaarkood waxay ku noqotaa carqalad soo uruurinta macluumaadka maadaama dhaqankii isku mid kayihiin la wareystayaasha qaar ma rabaan iney ka hadlaan ama wax ka sheegaan jiritaankoodii, sidoo kalana waxyaabo qaarkoodna ay ku adkaadaan is wareydiinta su'aalaha qaar dad isku dhaqan ama af ah. Goobaha shaqo ee lagu qabtay cilmibaaristan waxay ahayeen kuwo faa'iido leh natiijada cilmibaaristan iyo baahinteeda, laakiin ka faa'iideysiga natiijada cilmibaaristan waxay u baahan tahay dulqaad shaqo dheer iyo wada shaqeynta hay'adaha kale. Waxaa sidoo kale cilmibaaristan lagu falanqeyey aqoon isweydaarsi ay ka qeyb ahaayeen soomaali, kurdi iyo ruush, taasoo u faa'iido aheyd natiijada macluumaadka iyo fikirkii ay ka heleen cilmibaarayaashii war isweydaariskii ajaaniibtaas.

Waxaa in si degdega loo hormariyo u baahan adeegyada caafimaadka siiba adeega cilmi nafsiga ajaanibta, sababtoo ah inta u baahan barkeed uun baa hesho adeegaas. Horumarinta caafimaadka iyo baxnaaninta waxaa u baahan ka hortagista cayilka, awoodis darada shaqo iyo aan aalamiiteyn hadana ay ku yar tahay isticmaalka nafaqooyinka in loo saxo. Cudurada dadka qaasatan macaanka/sokorowga ka hortagisteeda sidii loo horumarin lahaa in lagu howleeyo ajaanibta. U fududeynta laqabsiga waddanka, siiba barashada luuqada ja hormooyinka qaarkood oo u baahan barista qorista iyo aqrinta, waxayna u baahan tahay waxyaabo baddankood in la qiimeeyo. Noloshu wanaagsan iyo kalsoonida nidaanka adeega finnishka ay ahaadaana kuwo lagu kalsoonaado, taasoo muhiimaduna tahay horumarinta caafimaadka iyo nololwanaaga.

*Dulucda hadalka:* ajaanib, caafimaad, nololwanaag, howlkarnimo